



Si aad u xakamayso jirarka, guriga ka saar waxyaabaha soo jiidanaya jirka oo ay ku jiraan cuntada, biyaha, iyo hoyga jirka oo baabi'i meelaha ay gurigaaga ka soo galaan

# Xakamaynta Jirka: Kahortag • Ka Saar • Dabin U Sameey




## Kahortag

### Aqoonsa Calaamadaha Dhaqdhaqaaqa

- Saxarada dooliga/jirka
- Daloolada


iyo calamadaha qaniinyada ee khudaarta, kartoonaada, alwaaxyada, weelasha caaga ah, iyo fiilooyinka

- Calaamadaha xoqidda ah ee dufanta leh ee derbiyada, deyrarka iyo meelaha laga soo galo



### Guriga Ka Saar Waxyaabaha Soo jiita

- Uruuri mirayaasha, lawska iyo khudaarta bislaatay iyo kuwa soo hoobtay
- Dabool daasadaha iyo weelasha qashinka
- Cuntada ku rid weelasha daboolan ee birta ah marka aad ku kaydinayso garaashyada iyo buushashka
- Cuntada loogu talagalay xayawaanka iyo shinbiraha ee aan la cunin meel fiican ku rid maalin kasta



### Baabi'i hoyga dooliga


- Keydadka alwaaxyada ku rasteey meel 12 inji dhulka ka fog
- Dhirta culus, sida bougainvillea iyo ivy, ka fogeey dhismayaasha iyo deyrarka
- Qashinka iyo qubka ka saar daaradaada



## Ka Saar


### Aqoonsa Oo Xir Meelaha Suurtagalka Ah Inay Ka Sii Galaan

- Dayactir ku sameey duleelada ka weyn rubuc adigoo isticmaalay fiilooyinka 18-22 meshka ah ee 1/4 inji ah
- Xir/buuxi dulduleelada albaabada hoostooda ah adigoo isticmaalaya birta albaabada
- Jar geedaha iyo dhirta u dhow saqafka



## Dabinka

- Dabino u dhig gidaarada, walxaha gadaashooda, geesaha mugdiga ah ee guriga, iyo hadba meeshii aad ku aragto dhaqdhaqaaqa jirka
- Xir dabinnada si aad uga ilaaliso dabinnada in la jiido
- Dabinta cunto ku rid ilaa dhawr maalmood kahor inta aanad dabinta wax ku qaban; Jiirku waxay bartaan dabinnada inay yihiin "ammaan" wayna fududaanaysaa in la qabto
- Iska ilaali in aad guriga ku dhex isticmaasho dabinta sunta lagu rido maxaa yeelay jiirku waxa laga yaabaa in ay ku dhex dhintaan gidaarada, taas oo abuuraysa ur xun oo soo jiidata duqsigu



## Talooyinka Badbaadada

- Saxarada jiirka Ku buufi dareere khafiif ah (9 qaybood oo biyo ah ilaa 1 qayb oo biliij ah) kahor inta aanad nadiifin
- Ka digtoonow markaad dabinnada dhigayso meel u dhow carruurta ama xayawaanka rabaayada ah
- Si taxadar leh u raac dhammaan tilmaamaha ku yaal calaamadaha badeecada dabinta jiirka

## Wac kormeerka wax ka barashada BILAASH AH ee jiirka!

Inta lagu jiro kormeerka jiirka, farsamayaqaanku wuxuu:



- Raadin doonaa calaamadaha dhaqdhaqaaqa jiirka iyo meelaha ay ka soo galaan
- Bixin doonaa tilmaamo lagu ciribtirayo deegaanka jiirka iyo dabinnada in la qabto
- Bixin doonaa xirmada ka hortagga jiirka sida mida halkaan lagu muujiyay

**WAC KORMEERKA WAX KA BARASHADA BILAASH AH EE JIRKA • (858) 694-2888**

# Jiirka

Jiirku waa cayayaan wax dumiya oo waxyeelleyn kara dhismayaasha iyo fiilooyinka korantada. Waxay sidoo kale sumayn karaan cuntada iyo biyaha waxayna faafin karaan cudurro. Xakameey jiirarka ku jira gudaha iyo hareeraha gurigaaga adiga oo baranaya sida looga hortago, Looga Saaro, Dabina Loogu Sameeyo!

## Ka saar Jiirka



### Jiirka Saqafyada (*Rattus rattus*)

- Waa noocyada ugu badan ee jiirka ee laga helo guryaha San Diego
- Wuxuu galaa meelaha dhulka ka sarreeya ee geedaha, saqafyada, iyo saqafka ah

Jiirku wuxuu guryaha ka geli karaa godadka iyo meelaha bannaan ee yar. Raadi oo xir dhammaan meelaha bannaan si aad uga saarto jiirka.



Cabbirka dhabta ah

## Raadi Oo Xir Duleelada



KAHORTAG • KA SAAR • DABIN U SAMEEY

Gobolka San Diego



*Barnaamijka Xakamaynta Fektarka*

**Kahortag**

• • •

**Ka Saar**

• • •

**Dabinka**

**Wixii macluumaad dheeraad ah, nagu soo booqo onlayn ee [SDVector.com](http://SDVector.com)**




GOBOLKA SAN DIEGO

Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka  
**Barnaamijka Xakamaynta Fektarka**  
5570 Overland Avenue, Suite 102  
San Diego, CA 92123  
(858) 694-2888



# Jiirka

**Kahortag • Ka Saar • Dabin U Sameey**



GOBOLKA SAN DIEGO

Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka  
**Barnaamijka Xakamaynta Fektarka**

[WWW.SDVECTOR.COM](http://WWW.SDVECTOR.COM)

[WWW.SDVECTOR.COM](http://WWW.SDVECTOR.COM)

[WWW.SDVECTOR.COM](http://WWW.SDVECTOR.COM)